# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Hadal-qoraalka iyo Gudiyadda

## Kal-fadhigii 29aad Fadhiyadii 12aad&14aad

## 15&20/12/2015

**Fadhigu Wuxuu furmey 10:34 AM**

**Gudoomiyaha:-** Baashe Maxamed Faarax

**Quraan:- Xildibaan Xaamud**

**Ajendaha Fadhiga: -** Dooda Xeerka ka hortaga Kufisga

**Gudoomiyaha:-** Waxaa shaley la idiin qeybiyay Xeerka Ka hortaga Kufsiga, fadhigan maanta waxaynu bilaabeynaa Dooda Xeerka, Mudanayaasha dooda ka qeyb-galaya ayaan ku soo dhoweynayaa, xildhibaan Baar Siciid Faarax ku soo dhowow doaada.

1. **Marwo. Baar Siciid Faarax** **(8min 42sec)** ASC, bacda Salaan, dhibaatada kufsiga ee ka jirta dalkeena waxay ka mid tahey dhibaatooyinka qaran ee dalka aafeeyay waxayna u baahan tahey in laga gurmado oo loo gurmado arrinka isaga ah, waxaan u qaadanayaa ninkii yidhaahda kufsi ma jiro ama wax lama kufsado inuu yahey nin xalaaleynaya kufsiga ama isagu xalaaleysanaya, 06 September ayaan tagey Magalaada Ceerigaabo, waxaan booqdey C,I,D-da magaalada waanu wareysaney waxay noo sheegeen in gabadh yar oo 3 jir ah la kufsadey lagu hayo dhakhtarka, arrinka halka maraya xaqiiqdii ciyaar ciyaar ma gali karo, intii qaangaadhka la kufsanayay sahal bay aheyd ee arrinkii saddex jir buu marayaa.

   Waxa kale oo jira oo soo korodhay markii hore kufsigu wuxuu ahaan jirey qof in nin uu gabadh kufsado meel kastaba ha iska heleene, iminka waa wadar oo 6 wiil, 7 wiil ama 12 iyagoo ah bay ku kufsanayaan waxayna noqontey farsamo cusub oo casriya, waxaan u maleynayaa Somaliland ama Golaha Wakiilada markaan sidaa u eego a jiro nin aan gabadh laheyn oo ka ugu yar baa mid ama labo hablood leh, mid walibana wuxuu leeyahey walaal la dhalatey, habar yar ama eedo, maaha waxani wax lagu dheel dheelo waa aafo qaran oo ina heysata iyo dhaqan xumo, qaar baa dhinta marka la kufsado, tan aan dhimanina waxay ku nooshahey silic, qoomamo iyo caloom xumo mustaqbalkeedii oo dhan mugdi baa la galiyay.

   Waxaa dhacdey maalin dhoweyd in halkan labada gole dhexdooda gabadh la kufsdey naloogu keenay oo la yidhi waxaa kufsadey nin askari ah.

**Anigu waxaan soo jeedinayaa:-**

- Arrinkani waa aafo qaran degaal buu u baahan yahay, xeer buu u baahan yahey, hadaan xeer la helin lama joojin karo xaqiiqdii imikaba waa lala dagaalamaa, waana xaaraan oo sharciga xaaraameeyay, umad muslima ayaynu nahey oo sheeganeynaa hadana ku dhaqmi meyno diintii oo weynu baal marney, waa xaaraan iyo dhibaato, iminkaba booliisku waxbuu ka qabtaa oo wuu la dagaalamaa, culimaduna way ka hadashaa inkasto culimada aan saluugsanahey oo ku saluugsanahey arrinka waayo waxyaabo kale oo basiid ahba way ka hadlaane oo masaajidda kaga kacaane, laakiin arrintan kufsiga dhawaaq badan kama sameyn.

- Waxaan Culimada u soo jeedinayaa in arrintaa dhawaaq badan ka sameyso oo aad uga hadasho.

- Waxa kale oo aan Golaha u soo jeedinayaa in Xeerka la ansixiyo waliba mid wanaagsan oo ciqaabtiisu aaney fududeyn, boqolkiiba baana Golaha ka codsanayaa in Xeerka deg-deg loo ansixiyo, Ciqaabtiisana la adkeeyo iyo in loo tudho hablaha ileyn nin waliba gudhigiisay joogtaaye, hadey sidaa ku siii socotana waxaa dhici doonta in nin waliba ta uu qabo (aafadiisa) gurigeeda lagu soo doonto.

2. **Md. Cumar Axmed Saleebaan (Sanweyne):-** **(6min 41sec)** Gudoomiye anigu badin mayo in yar baan ku darsanayaa, sidaa Xildhibaan Baar sheegtey arrintani waa aafo qaran, mucaarid iyo muxaafid, qabiilo iyo qolo, koox iyo qudh midna wax loo aaneyn karo maaha, waa wax in meel looga soo wada jeensto u baahan weeye, waxa weeye nin walibow gurigaaga hoos ugu noqon sida xildhibaanadu sheegtey waa hooyooyinkeen ama walaaleheen, gaaladaa marka xanuun ku dhoco ama qof ay jecel yihiin uu ka dhinto waxay tidhaahdaa “why me” maxay aniga iigu dhacdey oo ay qof kale ugu dhici weyday, marka hadeynu nidhaahno aniga iguma dhicine qof kale ayay ku dhacdey oo ku faraxsanaano waxay ila tahey inay diinta islaamka iyo dadnimada ka baxsan tahey.

   Gudoomiye, xeerkani dood badan uma baahan, laba xaaladood baa meesha yaal oo kala ah mid waa qofka falkan gala in odayaasheenu dhex-galaan oo arrintii dhameeyaan si ay inanta sumcadeedii u ilaaliyaan waxay uga jeedaan moojiye. tan labaadna, waa inaan xeer ciqaabeedka la marin, waayo xeer ciqaabeed baa jira qofka falkan ku dhaca lagu ciqaabo.

**Sidaa darteed, anigu waxaan soo jeedinayaa:-**

- Marka hore, in qofkii falka geysta ciduu doono ha u geystee oo ku ay ku cadaado in aanu xadhigiisu aanu ka yaraan 10 sanadood.

- In hadey dhacdoba, way dhacaysaa oo waa dhaqan aynu leenahaye, hadii la dhexgalo oo laga heshiiyo xaqal caam wax la yidhaahdo ayaa jira, qofka dambiga gala dambigu doono ha galee inagu xaq baynu ku leenahay oo umadana dambiga waa ka galey, markaa hadii la heshiiyo waa in xaqal caamkii umada laga jaro oo aaney noqon waa la heshiiyay oo halkaas ayay ku dhamaate ee qofka ugu yaraan 5 sanadood oo xaqal caamkii ah lagu xukumo.

- Wadankeenu malaha wixii lagu baadhi lahaa, waayo waxaa dhici karta in qofku qabsado qof aan waxba ku sameyn oo yidhaahdo kan ayaa I kufsadey, markaa tools-kii lagu baadhi lahaa oo DNA-du ka mid tahey waa inay xeer Golaha ka soo baxay noqotaa oo Dawladu DNA-dii iyo tools-kii lagu baadhayay keentaa, si loogu cadeeyo qofku inuu yahey kii dambiga galey.

- Waxaa la yidhaahdaa "Meel qiiq ka baxayo dabaa ka shidan" wax kasta waxbaa keena, waxyaabaha keenaya ee sahlaya waxaa ka mid ah dumarkii oo is qaawinaya oo xishoodkii ka tagey, markaa waxaan leeyahey Gudiddan Wanaag-farista ee iminkana Miisaaniyada inoogu jirta waa in la siiyo awood (power) ay ku xakameeyaan dumarkan suuqa maraya iyagoo qaawan ee aan xushmadeysneyn, diinteenuna ma ogola dhaqanka iyo is qaawintaas, markaa waa in warbaahinta la galiyo oo wacyigalin balaadhan umada loo sameeyo in dumarku is xushmadeeyaan iyaguna oo aaney soo jiidan kuwaa fal-dambiyeedka iyo dhaqan xumadaa ku dhaqaaqaya.

3. **Md. Xamze Maxamed Gaadaweyne:-** **(5Min 33sec)** Gudoomiye, arrintan maanta ina hortaal maaha mid cusub waxa weeye wax waligeedba dhici jirtey, laakiin sidey maanta u dhaceyso iyo sidey baryihii hore u dhici jirtey ayaa faraq weyni u dhexeeyaa, kufsigu wuxuu caan ku ahaa xaga baadiyaha raga heyjadaha jooga ee aan magaalo joogin oo aan dumar arkin, nimankaasi markey arkaan hablaha way kufsan jireen ninkaasi wuxuu ahaan jirey nin dhalinyaro oo dhaqan iyo edaab laheyn ayuu ahaan jirey, gabadhuu kufsadano halkaas ayaa ugu dambeyn jirtey mustaqbal.

Maanta maxaynu heynaa, magaalo madaxyadii Gobolada ee waaweynaa sida Hargeysa iyo Burco ayaa kufsigii yimi oo aan qof kaliya aheyn oo wax af-ingrisiga

lagu yidhahdo **(gungs)** waa wadar wada kufsanaya gabadh kaliya, waa daahirad uu wakhtigu wado, kaligeena inaguma koobnee waa wax wadamada badan ka jira waxaana wadamada aduun weynaha oo dhami ka yaaban yahey ka mid ah Hindiya, waa wadanka aduunka ugu kufsiga badan.

Waxa meeshii soo galey dhowr waxyaabood oo ka mid yihiin dadka faraha badan ee hablihii kufsanaya iyo booliiskii oo aan waxba ka qabaneyn isagoo waxaas oo dhan ogsoon khaasatan waxaan sheegayaa kufsiga Hindiyada oo kale.

Marka waxay ku soo urureysaa, markey waxaasi oo dhami dhacaan **talaabada laga qaado** ayaa had iyo jeer xukunta falkasta oo dhici kara, hadii dambiilihii waajibkiisa laga mariyo xaga xeerka waxaa hubaal ah kan dambe ee ku fakara in ay ku adkaaneyso inuu ku dhaco, xaqiiqada jirta waxa weeye in xukuumadu inay fiiro gaar ah siiso kufsigaa ka dhacaya magaalooyinka, dadka waxaa sameynaya waa la garanayaa oo waa inamo dhalinyaro oo ina hebel iyo ina hebel loo garanayo oo isku xaafad ah, markaa waxba yaan lagu xiiqin kufsiga inagu soo batay, hadii iminka xukuumadu siiso ahmiyadiisa Booliiskana ku booriso ilaa wa ilaa in la soo qabto cidii dambiga geysata oo **la xidho min 20 sano** walaahey inaan mar dambe loo noqoneyn oo joogsaneysaa.

Mudanayaal, waxa weeye geesta kale eega, inteenaas oo dhan waxaa laga yaabaa inaynu hablo badan leenahey, gabadh kasta oo la kufsada waa gabadhaada oo kale, hadeynu ka dhiidhiyeyno waxbaa ka qabsoomaya, markaa Xukuumadeena aynu ku boorino oo ku adkeyno inay ka hawl gasho oo hawl wanaagsan ka qabato arrintaas.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- Inaynu adkeyno Xeerka Ciqaabtiisa, Booliiskuna si dhab ah uga hawl-galo oo hawshiisa qabsado, Xukuumadu ahmiyadeeda siiso waxaa hubaal ah in wax badan laga qabanayo, waad-mahadsan tahey.

4. **Md. Xaamud Cismaan Cigaal**:- **(13min 7sec)** Gudoomiyaha, Mudanayaasha, ka soo qeyb-galayaasha dooda iyo Shaqaalaha waan salaamayaa, sharcigan iminka in horyaal sida runta ah seminar bari dhoweyd halkan lagu qabtey oo hay'adda UNDP qabatey ayaa lagu soo sameeyay, waxaa muuqata in had iyo jeer waxyaabaha aadka u muhiimka ah ee golaha horyaal oo ay ka mid tahey Xeerkii lagu xukumayay Golahan inaanu wali jirin, kii tacliinta oo sanado yaaley aanu iminka oolin waxaan aad iyo aad u dhaliilayaa mid daaqada laga soo tuurey wax kasta u jeedadiisu ha noqotee in sid deg-dega loo galo oo laga horeysiiyo Xeerarka muhiimka ah.

Dooda iminka halkn taala sharciga islaamka iyadoo shaleyto ay jirtey eedo culimada iyo shareecada islaamka oo halkan ka dhacdey oo waliba iyadoo nin xildhibaan ahi uu dooney inuu asturo oo yidhi intaa ha la masaxo taasna canaanteeda waxaa iska leh shir-gudoonka, Goluhu anshax buu leeyahey Goluhu haduu xildhibaan khaldamo waxaa waajib ku ah Shir-gudoonka inay saxaan oo yidhaahdaan arrinka ka noqo ama la noqo oo isaguna raaligalin bixiyo.

**Md. Siciid C. Rooble:-** Ajendaha ku soo noqo xildhibaan taasi dooda ajendaha kuma jirtee.

**Md. Xaamud Cisman Cigaal:-** Gudoomiye ayaa jira, Gudoomiya jira doc wareerka joojiya.

**Gudoomiye Baashe:-** Xildhibaanka dooda ha loo daayo, Xildhibaan jooji hadalka oo xildhibaanka dooda u daaya, mudane adna ha u jawaabin dooddaada waddo.

**Md. Xaamud Cisman Cigaal:-** Kufsigu waa jariimad xaaraan ah oo diimaha oo dhan dambi ku ah qofkasta oo caqli leh iyo kasmada saxda ahiba ay diidayaan, qawaaniinta aduunka ka jira oo dhamina ay diidayaan oo waa ficil aad iyo aad u xun, dabadeed waxaa waajib ah cuqaabad aad u adag in lagu xukumo qofka dambiga gala, islaamku sharci ayuu ka dejiyay oo wax aad la isugu dhibo maaha, marka hore waa Sino, sinaduna xukun bay leedahey, mar labaadka haduu khasab yahey oo qofku hub isticmaalo ama tahdiid kale isticmaalo wuxuu diinta islaamka ku noqonayaa MUXAARIM, muxaarimkuna waxa weeye waa nin dagaalamey oo ilaahey SWC wuxuu yidhi ***"way la jasaa'I yihiin kuwa Ilaahey SWC iyo rasuulkiisa CSW la dagaalama, dhulkana ku fidinaya fasaa'id in la dilo, in deldelo ama in gacmaha iyo lugahaba laga gooyo ama in laga masaafuriyo dulka"*** afarta sharci baa u yaal oo ilaahey SWC sheegay, masaafurka culimadu waxay ku micneeyeen in la xidho xadhig aad ah, Markaa waxaan leeyahey sharciga sida Quraanku sheegay baynu heysanaa ee ha lagu xukumo oo ha lagu dhaqmo isaga.

Waxa kale oo ka muuqata Xeerkan oo la leeyahey qofku hadaanu sinadii ka raali aheyn oo sidaa wax ku qaato, Sinadu sideeda ayay xaaraan u tahey, sida uu sheegay Xildhibaan Cumar Sanweyne English Common law wuxuu tilmaamaya in hadii gabadhada aad u yeedho oo ku diido oo hadey tidhaahdo maya oo aad khasabta waa kufsi waxay leeyihiin "maya waa maya" sideynu u kala saareynaa, islaamku wuxuu hadaad ooridaada u yeedho oo ku diido ilaa subaxnimada in Malaa'iku nacdaleyso.

Kalmadan “Ka hortaga” ee xeerka laga dhigay waan jeclaa, waayo maxaa sababaya in kufsi ymaado, waxaa ka mid waxyaabaha sababa dumarka qaaqawan, Rasuulku CSW wuxuu yidhi “naagtu hadey cadar isku shubto oo dibada u baxdo waa sidaa iyo sidaa “Kada wa-kadaa” waa Saaniya” way sineysatey weeye mecneheedu, Islaamku wuxuu xaaraan timeeyay haween inay socdaasho iyadoo muhrimkeedii aanu la socon oo xataa Xajka ma tagi karto bilaa muxrim, islaamku wuxuu diidey in gabadh aan asturneyn ay suuqa u baxdo, waayo, waxaa jirta laba Ayadood oo midna raga fareyso “ku Dheh raga mu’miniinta ah hoos u dhiga indhihiina ilaashada fajrigiina” raga intaasey kaga kooban tahey, dumarka waxay leedahey aayadu “ku dheh oo far haweenka mu’miniinta wajiyadiina qariya iyadoo wax marsatey, fajrigoodana ilaaliyaan iyo in aaney quruxdooda tusin ca’iladooda mooye” shantaas ayay aayadu fareysaa Dumarkii.

Ka hortaga, hadey ka hortageyno kufsi iyo sino waa ineynu intaaba joojinaa, hablaha yare ee Mobiles-ka sita ee fariinta loogu soo direyo sawirada, waa in la mamnuucaa oo markey iskuulka yimaadaan la jeeg-gareeyaa oo laga qaadaa, habeen oo dhan waxaa lagu jiraa Facebook iyo Viber, markay inantii isu sheegto ee telephone-keeda bixiso oo sawiradeeda siiso inamadii ma iyadaa wax kufsatey mise waa la kufsadey, inaney hadaad hadba gidaar la fadhiisato oo hadba tidhaahdo qaar kale inoo gee oo aad raacdo ragii ma adaa lagu kufsadey mise adaa sababey, markaa hadeynu ka hortageyno waa inaynu macnuucnaa iskuuladan hablihii iyo inamdii wada dhiganayaa ee wada fadhiisanayaan waxayna ka mid tahey waxyaabaha keena ee fududeeya kufsiga.

Markeynu doodneyno inaynu joojino oo ka hortagno Kufsi waa ineynu intaas oo dhan mamnuuco oo la joojiyo, waan ku raacsanahey Xildhibaan Cumar in DNA qalab lagu baadho la keeno, waayo maalin walba waxaad arkeysa dumar ku odhanaya na qaad, waxaa dhacda intey yidhaahdaan na qaad in markey gaadhigii fuusho ninkii ku odhaneyso lacag isii hadii kale waxaan odhanayaa wuu i kufsadey, waxaan ku idhaahdaa hablaha baabuurta ha raacina.

Waxaan kale oo soo jeedinayaa ka warama hadeynu **TUNO** ninka waxaa sameeya oo gabadh kufsada, kkkk, hadeynu dooneyno inaynu kufsi joojino waa ineynu itaas oo dhan fulinaa oo shareeco islaamiya ayaynu leenahey aynu ku dhaqano, Dumarku waa inay ogsoonaad Waajibka saaran ee diinta ka saaran ee xurmadooda ka saaran, ee dhaqanka saaran, nin diidaya in waxan la joojiyo ma jiro, laakiin waa in waxa keenaya ee sababaya Kufsiga la joojiyo, WSC.

5. **Md. Maxamuud Jaamac Cilmi (Dable):-** **(9min 49sec)** Gudoomiyaha iyo Mudanayaasha waan salaamayaa, Mawduuca arrintan aynu ka doodeyno waa

mid dunida oo dhan ka taagan oo ijtimaaci ah, intii ka horeysay wakhtigii diinta islaamku soo degtey islaamku waxyaabaha uu ka xoreeyay dadka waxaa ka mid ah odeyga afar xaas leh markuu dhinto inamadiisa afarta xaas dhaleen kan ugu weyn baa waran ka hortaagi jirey oo guursan jirey tan uu doonayo xaasaska aabihii ka dhintey waa hooyadii, waa aafo ilaahey casiiska ahi uu umada ka nooleeyay, jaahiliyadu maaha dambiga ee jaahiliyadu waa wacyi la'aanta, inagu Diintii islaamka weynu heysanaa oo sidii reer bani isra'iil wixii ina cajabiya ayaynu ka qaadanaa.

Aafada ijtimaaciga ah islaamkuun baa badeli kara, dastuurkeena waxaa ku qoran shareecada islaamka ayaa u saldhiga ah, qaanuunka ciqaabaadkana kuma xusna, sida ninka waxaa sameeya waxaa lagu xukumadaa waxay shareecadu ka qabto, dilku waa dil laakiin wixii kale looma eegin xukunkii shareecada islaamka, waxaan leeyahey Islaamku waa marjaca kaliya ee somalidu waxay ka baqdaa waa qaanuunka islaamiga ah, waxaa ka wanaagsan in la soo dheegto xeer gaalo, arrimahani madaama ay ijtimaaci yihiin waxaa fiican in Wasaarada Diinta iyo Wasaarada Qoyska ay qeyb ku leeyihiin.

In la xidho waxaa ka wanaagsan in sharciga la mariyo, waxaa la odhan karaa in sharciga la mariyo qaanuuna lagu qaado waliba, waxaa dhacda marka inan la kufsado oo dhibaato loo geysto in odayaashu yidhaahdaan war intaas oo halaad inoo qaada iyadana xuquuqdeedii halkaa ku lunto oo iyadu noqoto victim aan heysan cid u hiilisa, waxa kaliya ee u hiilin kara ee marjac u noqon karaa waa Shareecada islaamka, markaa in Sharciga islaamka lagu saleeyo oo sharcigu ka sareeyo waxay odayaasha dhaqanku ku heshiiyaan si aaney inanta xuquuqdeedii u lumen.

Arrinta kale ee jirta waxa weeye, arrinta wacyiga loo sameeyaa wuu yaryahey, AIDska loo sameeyaa stikers iyo wacyigalin war tan ayaa ka daran AIDska oo wacyigalin badan u baahan, bini'aadmi dhan oo inta lagu tacadiyay xaqiisii la tuurey oo kii ku tacadiyayna intuu geel bixiyo halkaa ka baxayo ka daran AIDska la sheegayo, waa iney jirtaa qaanuun islaamiya oo loo sameeya, hay'adda ku shaqada leh Wasaarada Qoyska iyo Wasaarada Diinta oo hadey Hay'addi stikers daabaceyso oo wacyigalin sameyneyso waa in labadaas la kaashataa oo go'aamisaa, waa in la sameeyo maalinta kufsiga oo la yidhaahdo waa maalintii kufsiga.

Dhakhtarku waa inuu noqdaa marjaca kaliya ee wixii dhacey loogu noqonayo, CID-du warqad bay bixineysaa, Nin gaadi wata maalin dhexdaasa hablaa soo fuuley oo waxay yidhaahdeen kharash noo dhiib walaahey hadii kale wuu na-

kufsadey baanu odhaneynaa, markaa arrintaasina waa iney jirtaa wax u yaal oo wax lagaga qabto masabidaada aan jirin.

Wasaarada Arrimaha Bulshada waa in meel lagaga daraa qiyamka akhlaaqda oo iyadu qaabilsan tahey oo fulinta arrimahaas ay iyada iyo Wasaarada Diinta iyo Awqaaftu iska kaashadaan.

**Waxaan ku soo gabo-gabeynayaa:-**

- Waa inay jirtaa Hay'adda arrinta qaabilsan cid kasta ha sameysee Dawlad iyo Hay'adoba, intaas oo hay'addood baa jira sida tan AIDska, markaa waa in hay'adda qaabilsan waxyaabahaas akhlaaqiyaadka la sameeyo.

**Sixitaan, Siciid C. Roble:-** waxaan saxayaa Gudoomiye horta anaga UNDP nooma keenin xeerkan, Wasaarada Qoyska iyo Wasaarada Cadaalada oo wada socda ayaa gudidayada u keentay, taasi waa qodob, waxaana jecelahey sidaa uu Xildhibaan Dable u sheegey inteynu Wasaarada Qoyska u yeedhno halka kaga warbixiso, sidaan shaley halkan ka sheegay Xildhibaan Xaamud iminka sida uu yidhi anigu maan odhan culimano maan aflagaadeyn, hadalkeygii shaley waxaan u jeeday sidaa dable u qaatey ee u fahmey, aafyo ayaa jirta umadii ku habsatey shareecona waynu leenahey, marka laba uun in la sameeyo ayaa haboon in la qaato shareecadi oo lagu dhaqmo iyo in Xeer adag oo xakameeya lagu dhaqmo, sida xildhibaanku sheegayna waxaan ka hadleynaa maaha sida dumarkan uu ka Hadley, waxaanu ka hadalney inan yar oo 4 jir ah oo la kufsadey iyo inan reer miyi ah oo aan facebook iyo filmadan arag oo la kufsadey baa jirta, aafadaas ayaa jirta oo aan ka sheekeynaysaa, maaha Sinada ee xoogan iyo kufsiga, markaa anigu culimo ma aflagaadeyne intaasuun baan sheegayay, WSC.

6. **Md. C/qaadir X. Ismaciil Jirde:-** **(9min 49sec)** dunidu waxay tidhaahda markii diintii laga tagey waxay tidhi waa secular religion, xaqiiqadu sidey tahey wuu xadhka goostey kufsigii baryahan diinta islaamkuna waxay ilaalisaa dadka inta nugulka ah oo intaas ayaa cidkasta ugu xuquuq badan hadey caruur ahey, hadey dumar tahey iyo hadey dadka dhimirka tahey waxaa soo raaca dadka soo qaxa ee barakacayaasha ah diintu intaasey inta badan culeyska saartaa, yaynaan afkaartan leh waxani dibada ayay ka yimaadeen dadka xuquuqdoodii ugu tumanin.

   Ahmiyada koowaad waa inaynu ilaalino dadka inta nugul waajib baana inaga saaran, halkan ayuu inoogu soo galey kufsigu askarta meesha ilaalisa

xaafadooda waxaa ka dhacey inan 14 jir ah oo agoon ah ayaa reerkii u dirsadey adeeg markii dukaankii ka soo noqotey 13 inan oo jaarka ah ayaa intey qaateen bohol kula dhacey, qeyladeediina dariskii way ka baqeen dhalinyaradii oo faashash baa la sitaa, inanta yare ee iyada iyo waalidkeed dhaawaceedii loo kala tagayo xilkaasi yuu saaran yahey iyo cuquubada dhacdey, inagu cuquubada waxbaynu ku leenahay hadeynana siduu yahey wax uga qaban, statistics-ka ana waxaa noo imanayaga gudidayada Taliyihii Ciidanka Booliiska anigu waxaan odhan lahaa inta halkan loogu yeedho kufsiga wax ha laga weydiiyo intuu le'eg yahey, Xeer-ilaalinta ha loo yeedho si xildhibaanadu ugu qancaan mushkiladu intey le'eg tahey oo yaaney inoo muuqan Hay'addahaas oo yaaney ka xoog badan xaqiiqada jirta, waynu ognahey in aaney kheyr wadin laakiin maanta arrinta taal ayaa ka weyn.

13 inan markey waxaa geystaan waalidkoodii baa soo yaacaya, qaar odayaashii iyagoon inankiisii arag buu la soo taagan yahey waan ka dhaaranayaa in aanu inankaygu ku jirin.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- Markaa niman yahow yaynaan dhibaatada indhaha ka qarsan inagoo eegayna halkuu ka yimi, Xeerkaa aynu ka shaqeyno oo Xeer-ilaaliyaha iyo Taliyaha Booliiskaba loo yeedho si wax looga weydiiyo, WSC.

7. **Md. C/raxman Yuusuf Cartan:-** **(5min 16sec)** Mudanayaasha Sharafta leh Mudanayaal iyo Marwooyin ASC, waxaan taageerayaa intaynaan Xeerka doodiisa si qoto dheer u galin in Taliyaha Booliska iyo Xeer-ilaaliyaha u yeedho oo wax laga weydiiyo duruufaha dhabta ah, ee jirta iyo faldambiyeedyada ka dhasha kufsiga si loo fahmo Xeerka iyo baahidiisa xidhibaanada shakigu kaga jirona ay u ogaadaan xaqiiqda jirta.

   Waxaan rabaa inaan xildhibaanada xasuusiyo ineynu aheyn bulsho dhaqan leh oo dhowrsoon iyo kale dambeyni jirto wadankii burbur baa ku dhacey oo qoyskii dibada markuu tagey burbur baa ku dhacey dhaqankiina ay ka tageen oo dhaawac baa ku dhacey, waxaan leeyahey maanta taladii caruurtu waayeelna gacanta uguma jirto, waalidna uguma jirto hablo iyo wiilal suuqa lagu shaahayaa cid waalid iyo dhageysanayaan ma jirto ficilo aad u fool-fool xun ayaa wadankii ka dhacaya, arrimahaas anshax wax xeer oo ka yaal ma jiro, markaa waxaa loo baahan yahey ileyn bulshadii is badal baa ku dhaceye in Xeerar isbadalkaa la jaanqaadaya ee kufsiga ah, gaagiska ah iyo dadka caruurta ka

faa'ideysanaya caruurta aaney waalidkood war u hayn waxaas oo dhan Xeerar Xakameynaya waynu u baahanahey.

Arrinta kale ee in la is dultaago u baahan waxa weeye, markey dhacaan ficilada xumi inta badan waayeel baa soo faro-galiya iyo odayaal dhaqan, waxbaa la kala qaataa, xaal baa la kala qaataa aan waxba ka gaadhin dhibantii oo odayashii inanta iyo odayaashii kii dhibta geystay baa heshiiya, qofkii dhibtu gaadhey lama xasuusto, caafimaadkii iyo dhibtii soo gaadhey sidaasa lagu ilaawa.

Waxaan jeclahey Xildhibaanada oo dhami in arrinta si dhab ah oo serious ah ula macaamilaan markeynu u yeedhno oo warbixin ku saabsan ka helno ciidanka ku shaqada leh, hase yeeshee waxaad moodaa siyaasiyiintii hadey tahey Golaha Wakiilada iyo Golaha Xukuumada inay shicibkii ay kala xidhiidh furteen, waxaad moodaa in aaney ka warheyn dhab ahaantii waxa ka dhacaya iyo waxa si dhab ah uga jiraba, marka gudoomiye waxaa fiican inteynaan xeerka gudo galin in si dhab ah loo fahmo oo muhiimadiisa siino, waliba xeerarka inoo yaal sidey wax uga qabtaan dad inooga warama ayaynu u baahanahey, WSC>

8. **Md. Ibraahim Axmed Reygal:-** **(8min 58sec)** Shir-gudoonka iyo Xildhibaanadaba waan salaamayaa, runtii xeerkan ina horyaal waa mid aad u qiimo badan intaa xildhibaanada sheegeen marka hore waan taageerayaa boqolkiiba laba boqol, waxaan ku darayaa marka arrintan oo kale dhacdo talaabada laga qaado ee ah odyaaal baa is arkey, xoolaa la kala qaatey, xaal baa kala qaatey, marka hore hadey xeerka ku jirto waan ka xumahey in lagu soo darey, hadaanu ku jirina lagu daro in aan Xoolo iyo xaaltoona la kala qaadan karin arrinta ciqaab la saaro oo kuwa u olaleynaya dadka waxaa geystey ciqaabta lagu daro.

   Gudoomiye waxaan ku talinayaa, yeedhistaculima'udiinka qeyb ka mid ah lagu daro si Iyana xaga shareecada wax inooga iftiimiyaan, waxa kale oo aan Gudoomiye soo jeedinayaa, waad ogtahey oo wax aad u faro badan oo xikmada ah oo inagu documents diplomasy ah halkan kuma saxiixnee, Xeerar baynu ansixinaaye in media marka wax la ansixiyo meel kala istaagaan waaya inaynu u yeedhno si ay u baahiyaan waxay ku baahinayaana sameyno intii suurto-gal ah, inta doodu socoto umadu aad u maqasho oo Somaliland kaliya maahee inta afsomali ku hadasha mushkiladani way heysataaye media aad ha loo galiyo ilaa ka gaado degmooyinka iyo tuulooyinka.

   Waxaan intaa ku darayaa, maah-maah iyo hees mid ay aheyd baa tidhaahdaa "faraskaagii laga badi" waxaa had iyo jeer afkeena ku badan hay'addaha iyo gaaladii baa waxaa sameynaysa, hay'addaha iyo gaaladu toodii bay wataan oo

adiga taadii kuuma wadaan, waxaan tusaale u soo qaadanayaa kaniisadaha markii ciddi galiweyday waxaa shaqaaleheedii oo dhan loo direy hay'addo samo-fal, markii loo direy waxa lagu lamaaneyay oo waa la hubeeyay oo micnaheedu yahey cilmi baa la barey, dhaqaale ayay wataan, saddex waa il-bax, afar waa la soo tababarey, waxaa ka mid ah dadku yaaney marnaba idinka dareemin in aad gaaleyneysaan waxaa fidineysaan, xijaabka la qaata, gadhka la baxa oo ereyada islaamka la isticmaala.

Hadaba Wadaadka hay'addahan soo direy shaqadiisii buu wataa aynu ka baaqsaney oo wadaadkeenii ka baaqsadey ileyn isagii baa dadkii baahnaa siyaaro ka guranaya halku wax bari lahaa oo wax tari lahaa, Dawladii ka badiye oo halkey dadkii wax tari lahaayeen iyagaa hay'addihii gacmaha hoos dhiganaya oo leh miisaaniyada noo kordhiya ama aqalkan noo dhisa, caruurihii gaajoonayay iyaga wax siinaya, iyagaa ceel u qoda, iyagaa iskuul u sameynaya, iyagaa buugaag iyo waxay u baahan yihiinba ka Kaaba, marka maaney inaga badani, marka waxaan leeyahey inteynu hadba leenahey hay'ad baa wax keentey meynu inaguba wax keeno oo hore u keeno.

Diinteena Islaamku waxay sheegeysaa in caruurtu markey qaan-gaadho loo guuriyo, inantiina sidey u dhuudhumaneyso hadey wax soo hesho ayaa la odhanayaa oo laga bilaabayaa yarad keen intaas oo xoolo ah keen, inanku waa qoloma iyo muxuu heystaa, intaasi waxay keentay in guurkii yaraado oo caruurtii baqdo oo isla dhuuntaan, waa in dhalinyaradii loogu daraa qorshaha cuntada iyo qorshaha tacliinta oo aynu qorshe u sameysano hadeynu nahey umad waalid iyo masuul, arrintaasna hanuuniteeda kala qeyb-qaadano bulshada hadeynu nahey xildhibaano, waayo arrintaasi waa dhibaato iyo aafo jirta.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- Sidaa Xildhibaanadu hore u sheegeen arrinta aad aynu uga baaraan degno oo halkey mudan tahey aynu dhigno, waliba xeer uun yaynaan sameyne aynu ka daba tagno oo hoos u daadegno ilaa Xildhibaan kasta deegaankiisa si uu uga shaqeeyo, hadii kale akhlaaq burburka sii kordhaya, dhalinyaradana canaanta waa la leenahaye yaynaan iyaguun waxba canaan, WSC.

9. **Md. Maxamed X. Xuseen Ciise:-** **(4min 2sec)** Shir-gudoonka iyo Mudanayaashaba waxaan ku salaamayaa salaanta islaamka ASC, Gudoomiye Xeerkan marka guud ahaan si guud loo eego waa xeer la odhan karo waa loo baahan yahey waayo dhibaatooyinka la rabo in lagu xakameeyo waa

dhibaatooyin jira oo wadanka ka dhaca dadkana dhib ku haya, mudadaa dheer ee Somaliland jirteyna faldambiyeedkan kufsiga iyo wixii la xidhiidha way dhacayeen, markaa waxaan soo jeedinayaa ugu horeyn hadii aynu rabo in sida ugu adag looga hortago oo loo joojiyo kufsiga waxay noqoneysaa in sharciga la adkeeyo, hadii aynu isku raacsanahey marka la eego in la xakameeyo inaynu isku raacsanahey.

Dastuurku wuxuu sheegaya in Xeerarka la waafajiyo Shareecada islaamiga ah, kufsiguna wuxuu ka mid yahey noocyada sinada waana waxyaabaha shareecadu sheegeyso ciqaabteeda iyo sida loo xukamayo, dastuurkina wuxuu leeyahay xeer shareecada ka hor-imanaya lama sameyn karo sidaa darteed, waxaan leeyahay marka hore hadii Xeer adag oo ka hortaga kufsiga iyo dhibaatooyinka uu ku hayo dumarka waa in la is-waafajiyo inuu Xeerkaasi ciqaab adag oo joojin kareysa xambaarsan yahey iyo in aanu shareecada ka hor-imaneyn.

**Marka Waxaan Soo jeedinayaa:-**

- Ciddii Xeerka dabada ka soo riixdey ee Gudidda Golaha iyo sida la sheegay Xeer-ilaaliyaha Guud Xeerkan halkey ka soo dheegeen iyo halkuu salka ku hayo, ka bacd Goluhu dib u eego oo wixii ka khaldan la saxo lana waafajiyo Dastuurka, markaa xeer-ilaaliyaha guud iyo cidda Xeerkan keentay ha loo yeedho. WSC.

10. **Md. Xuseen Ismaaciil Yuusuf:-** **(2min 41sec)** Bismilaahi, xildhibaanada Hadley oo Reygal iyo Maxamed X. Xuseen ugu dambeeyen aad iyo aad baan u taageersanahey, waliba hadalkii dheeraa ee xidhibaan Reygal oo aad u qiimo badnaa wuxuu ka Hadley sidii waxan loo daweyn lahaa, waliba rageen halkan ka hadlaya hablaha ay ku dhacayaan kuweenay la mid yihiin maaha wax la fududeysan karo, si loo joojiyo arrintan foosha xuna waa in qofka gala ciqaab ciqaabta ugu xun ha la marsiiyo, ciddii keentay ha la ogaado, arrintu waa mid diiniye shareecadu maxay ka qabtaa waa in la waafajiyo Culimada iyo Wasiirka Diinta ha yimaadaan, ha la iska kaashado oo shareecada hoos ha loo baadho.

Falkani maaha sino, xaq waxay u leedahey aynu gayno, wayna fool xuntahey wayna soo kordheysaa, waxayna ila tahey, booliisku wuxuu kaaga waramayaa wixii dhacey oo intaas ayaa dhacdey buu odhanayaa iyo intaas ayaanu xidhney oo xog buu hayaa, maxkamaduhuna waxbay xukumaan, Culimada diinta ino heysa aynu u yeedhno oo Culimada iyo Gudidda arrinta ku shuqul leh ha iska kaashadaan oo cid kasta ha soo curisee ha laga soo saaro Xeer aan arxan laheyn,

wayna hawl yartahey, waayo shareecada ayuun baa loo eegayaa waana laga sareysiin karaa haduu wax cad la waayo oo qiyaas baa lagu saleyn karaa.

**Markaa Gudoomiye:-**

- Ha loo yeedho wixii la yidhi ha loo yeedho oo Culimadu ha ku jirto WSC.

**11. Md. Cabdi Maxamed Jaamac (Gaagaale)** **(1min 14sec)** Hableheenii maalin kasta la odhanayay halkaas ayaa lagu xumeeyay waynu daawaneyney maantuu xeerkii inoo yimi isagoo hore waajib inoogu ahaa oo la inaga sugayay dadkuna inaga filayay, Xeerkan Ciqaabtiisa ayuun baan anigu mid ka odhan lahaa, halka laba sanadood ku qoran tahey waxaan soo jeedinayaa in 7-20 sano ha laga dhigo, caalamkana inta badan waa 7 sano, waxa kale oo aan raacsanahey Xildhibaanada yidhi ha loo yeedho Booliiska iyo Cidii ku shuqul lehba si wax looga weydiiyo aad baan u raacsanahey.

**Sixitaan, Marwo Baar:-** Xildhibaan Maxamed Xuseen baa iminka lahaa xeerkan halka laga keenay iyo halku salka ku hayo, waxaan leeyahay Xeerkan Obamana ha keenee haduu doonayee inaga shareecadeena islaamka iyo dhaqankeena waa inaynu raacnaa oo dhibta meesha taal ka fikirna, waxaa la yidhi dhicisku inta birta loo soo situu bakhtiyaa, inta wax kale la isku mashquulinayo sidii Xeer wanaagsan u soo saarin lahey oo ciqaab adag uga sameyn laheyn falowgeeda aynu galno.

**Gudoomiyaha:-** Waxa aynu dooneynaa waa inaynu ogaano xogta iyo sida wax yihiin, marka waynu u yeedheynaa, fadhiguna sidaas ayuu inoogu xidhan yahay waa inoo fadhiga barito.

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSl** |
| ------------------------------------------------ | ---------------------------------------- |